



# AQRI

— SIDA LOO TAAGEERO AKHRISKA MADAXBANAAN  
EE UGU HORREEYA ILMAHAAGA

## ISKU DAYGA UGU HOREEYA ILMAHAAGA EE AKHRISKA

Sii ilmahaaga inuu helo dareen ah in ay iyagu akhrin karaan - xitaa haddii ay xusuustaan ereyada ama ay qiyaastaan waxa ay u taagan yihiin.

Ilmahaagu wuxuu adeegsan doonaa istiraatiijiyado kala duwan iyadoo ku xiran inta ay ka gaareen horumarkooda akhriska. Markii hore ilmahaagu wuxuu xusuustaa oo qiyaastaa ereyada oo ku slayasan sawirada iyo ficilka. Si tartiib ah ilmahaagu wuxuu isbarbardhigi doonaa qiyaasahooda iyo xarafka/dhawaaga ugu horeya ee ereyga. Kadib waxay bilaabi doonaan adeegsiga dhammaan dhawaagyaada xarfaha waxayna ku dhisayaan ereyo.



*Waxaan rajeynayaa inaan mar kale idinla*

## KOR U AQRI OO TILMAAM EREYADA

Waxaad ku caawin kartaa ilmahaaga adigoo kor u akhrinaya buugga kahor intaysan iyagu akhrisan. Waxaad sidoo kale kor ugu akhrin kartaa buugga isla waqtigaas.

Waa fikrad wanaagsan in aad ilmahaagu u oggolaado inuu tilmaamo ereyada marka la akhrinayo. Markii hore waxaad ku taageeri kartaa adigoo tilmaamaya ereyada isla waqtigaas uu ilmahaagu tilmaamayo ereyada.

*Xaggee ayaad u malaysaa 'eey' in uu joogo?*



*Waxaa jira 'eey'... iyo 'eey' wuxuu ku bilaabaaxarafka 'D' sida Dorothy*

## KU CAAWI ILMAHAAGA INUU AKHRIYO EREYADA

Waxaad ka caawin kartaa ilmahaaga inuu akhriyo ereyada adigoo:

- u oggolaanaya ilmaha inuu qiyaaso iwaxa ku saleysan sawirada ama macnaha guud
- dhahaaya xarafka/dhawaaga ugu horeya ee ereyga
- Ku dhiirigelinaya ilmahaaga inuu dhaho xarfaha/dhawaagyaada ee ereyga
- dhahaaya qaybta hore ee ereyga
- siinaya ilmahaaga waqti
- ugu akhrinaya ereyga kor ee ilmahaaga

Marka uu ilmahaagu akhriyo wax aan ahayn waxa qoraalku sheegayo, waa inaad iska ilaalisaa saxiitaanka ilmahaaga, ilaa aysan saameyn ku yeelanayn fahamka waxa la akhrinayo.

## UGA DHIG AKHRISKA ILMAHAAGA MID LAGU RAAXAYSTO

Ku amaan ilmahaaga isku daygiisa inuu wax akhriyo - xitaa haddii ay xasuustaan ama qiyaastaan. Ilmahaagu wuxuu dareemi doonaa inuu wax badan akhriyo, markaad ku dhiirrigeliso oo aad xiiseyneyso akhriskooda.

Waxaad ku kicin kartaa ilmahaaga, tusaale ahaan, adoo leh:

- Waxaan dareemi karaa in aad u malaynayso in akhri-sku ciyaar yahay.
- Waxaan qabaa in aad la timaado talooyin fican.
- Waxaan rajaynayaa inaan mar kale idinla akhriyo.

Sheyga ugu muhiimsan waa in ilmahaagu isku dayo inuu wax akhriyo oo uu dareemo inuu akhrinayo.